

Wadaagista Macluumaadka Ilmaha Child Information Sharing




Somali | Soomaali

Waa maxay sababta aad u rabto inaad la wadaagto macluumaadkayga?

Daryeelida carruurta reer Victoria

Si loo caawiyo dhammaan carruurta Victoria inay ku noolaadaan nolol ammaan ah oo farxad leh, Xukuumadda Victoria waxay horumarinaysaa habka macluumaadka ay u wadaagaan xirfadlayaasha qaarkood ee carruurta la shaqeeya.

Adeegyo badan ayaa horayba u wadaaga macluumaadka. Qorshaha Wadaagga Macluumaadka Ilmaha (The Child Information Sharing Scheme - CISS) wuxuu u fududeeyaa xirfadlayaashan inay arkaan sawir dhameystiran oo ah ubadka ay la shaqeeyaan, taas oo ka caawinaysa inay fahmaan waxa ay wadaagi karaan, iyo sida loo ilaaliyo sirta qoyska.



Carruur badan ayaa u baahan doona taageero mar ay noqotaba noloshooda. Laga bilaabo wakhtiga ay dhashaan, ilaa ay ka gaadhaan 18 jir, Dib-u-habaynta Wadaagga Macluumaadka Ilmaha waxa ay caawisaa carruurta iyo qoysaskooda in ay taageero fiican ka helaan xirfadlayaasha iyo ururada.

Sidee bay u caawisaa qoysaska?

Sidee ayay u caawisaa xirfadlayaasha?

Wadaagista Macluumaadka Ilmaha waxay u saamaxdaa xirfadlayaasha taageera isla markaasna daryeela carruurta (sida macallimiinta iyo kalkaliyayaasha caafimaadka) inay ayaga isla wadaagaan aqoontooda ku saabsan ilmaha, iyadoo sidoo kale la siinayo tilmaamo ku saabsan waxa la wadaagayo, iyo sida loo ilaaliyo sirta qoyska.

Tusaale:



Taj ayaa hadda dugsiga bedelay. Macallinkiisa cusub, Sarah, waxayogaatay inuu ka caga jiidayo inuu ka dhix hadlo fasalka, oo ay dhibaato ka haysato dhamaystirka shaqadiisa dugsiga. Markay ka codsatay dugsigii hore ee Taj inay usoo gudbiyaan macluumaadka ay ka hayaan, Sarah waxayogaatay inuu qabo dyslexia, taas oo ka dhigaysa inuu ka labalabeeyo inuu ka qaybqaato howlaha fasalka.

Tani waa tusaale ah macluumaadka lagu wadaagi karo iyada oo loo marayo Wadaagista Macluumaadka Ilmaha (Child Information Sharing), maadaama ay u oggolaanayso macalinka Taj inuu sameeyo qorshe cashar oo taageera baahida waxbarasho ee Taj.

Yaad la wadaagaysaa? Sidee loo isticmaali doonaa?

Nooca macluumaadka la wadaagayo

Macluumaad kasta oo taageeraya wanaagga ama badbaadada carruurta waa la wadaagi karaa. Tani waxay noqon kartaa macluumaadka sida taageerada xirfadeed ee ilmuu helayo, ama aragti ku saabsan xidhiidhada qoyska.

**Waxa
macluumaadka
loo isticmaalayo**

**Si loo hubiyo
inaadan u baahan
inaad sheekadaada
u sheegtid laba mar**

**Ka qayb gelinta
dadka saxda ah
ee caawimaada
bixin kara**

**Si loo arko
sawir
buuxa**

**Si carruurta
looga caawiyo
inay koraan**

Yaa wadaagi kara oo heli kara macluumaadka?

Kaliya dad gooni ah ayaa awood u leh inay wadaagaan macluumaadka - ma aha qof kasta. Dadkani waa xirfadlayaal ay waajib ku tahay daryeelka iyo ilaalinta carruurta, sida macallimiinta, dhakhaatiirta, shaqaalaha bulshada iyo la-taliyayaasha, kalkaliyayaasha iyo booliska.



Tusaale:

Lisa waa kalkaaliso dugsi oo la shaqaynaysay Alice, iyo gabadheeda shan jirka ah, Jasmine, ee qabta wadno xanuun yar. Maadaama ay Jasmine bilaabayso dugsiga hoose, Lisa waxay la hadashay Alice, waxayna waydiisay aragtideeda ku aadan la wadaagida macluumaadka xaalada Jasmine kalkalisada dugsigeeda hoose, si loo hubiyo inay ka warqabaan baahideeda. Lisa way ka warqabtaa aragtida Alice ka hor intaysan wadaagin macluumaadka.

**Tani waa tusaale marka xirfadle uu dooran karo inuu
macluumaadka la wadaago, iyo cidda ay la wadaagi karaan.**



Goorma ayaa macluumaadka la wadaagi karaa?

Macluumaadka lama wadaagi karo in:

1

Loo isticmaalayo in kor loogu qaado fayoobida ama badbaadada ilmaha (ama kooxda carruurta) mooyee.

2

Wadaagistu ay ka caawin doonto bixinta adeegyada, ka dhigida qorshaha ama baarista ama maaraynta khatarta carruurta mooyee.

3

Aysan khatar ku ahayn qofna, ama sharci ahaan aan ha la mamnuucay ama laga saaray sida waafaqsan xeerarka mooyee.

Si aad u hesho liiska dhameystiran ee shuruudaha ay tahay in la soo buuxiyo ka hor inta aan macluumaadka la wadaagin, booqo www.infosharing.vic.gov.au

Sidee loo wadaagaa macluumaadka?

Hay'adaha iyo xirfadlayaasha si sharci ah loo oggolaaday ayaa cadsan karo macluumaadka ama waxay go'aansan karaan inay wadaagaan.

Ka dhigida macluumaadka mid gaara ama sugar

Qayb ka mid ah ilaalinta carruurta ayaa waxay tahay xaqijinta in xogtooda sidoo kale la ilaaliyo oo la xafido. Wadaagista Macluumaadka Ilmaha waxay taageertaa sharciyada sirta ah ee jira iyadoo u sheegaysa xirfadlayaasha marka ay wadaagi karaan macluumaadka sida waafaqsan sharciyadaas. Waa dembi in la wadaago macluumaadka sirta ah marka aan loo baahnayn. Intaa waxaa dheer, dhammaan macluumaadka waa in ay si amaan ah u kaydiyaan ururada shakhsi ahaaneed. Tababarka waxaa la siiyaa xubnaha shaqaalaha fasaxa u heysta, si ay u ogaadaan mas'uuliyadooda.

Tusaale:

Andy waa shaqaale taageero bulsho oo ka hela codsi sarkaalka ogolaanshaha dugsiga sare si uu ula wadaago macluumaadka ku saabsan Lee. Andy wuxuu taageeray qoyska Lee markii ay muddo yar guri la'aan ahaayeen. Ka dib markii uu la tashaday Lee iyo qoyskiisa, Andy cidna lama uusan wadaagin macluumaadka ku saabsan xaaladdooda nololeed, maadaama uu tuhunsan yahay in loo isticmaali karo in Lee laga saaro diiwaangelinta dugsiga.

Tani waa tusaale ah marka aan loo baahneyn in xirfadlayaashu aysan wadaagi karin macluumaadka - sarkaalka oggolaanshaha ma aha xirfadle fasax u heysta, macluumaadkana looma isticmaalo in lagu taageero wanaagga ama badbaadada Lee ama qoyskiisa.

Cabashooyinka

**Haddii aad ka welwelsan tahay
in macluumaadka loo wadaagay
si aan la oggolayn, waxaad xaq u
leedahay inaad dhiibato
ra'yigaaga oo aad cabasho
samayso.**



**Si aad cabasho u samayso marka
hore, la hadal hay'adda xogta
bixisay. Dhammaan ururadu waa
inay lahaadaan nidaamyo ay wax
uga qabtaan cabashooyinka.**



**Haddii aadan ku qanacsanayn in arrinta la xaliyay,
cabasho ayaa laga yaabaa in loo diro:**

Xafiiska Guddoomiyaha Warfaafinta Victoria (The Office of the Victorian Information Commissioner) haddii cabashadu ay ku saabsan tahay macluumaadka shakhsiyeed

Website: ovic.vic.gov.au / Taleefanka: 1300 666 444

**Guddoomiyaha Cabashooyinka Caafimaadka haddii cabashadu ku saabsan tahay
macluumaadka caafimaadka**

Website: hcc.vic.gov.au / Taleefanka: 1300 582 113

**Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo
ku saabsan Qorshaha Wadaagga Macluumaadka
Ilmaha waxaad:**

Naga soo wici kartaa: 1800 549 646

Noo soo qor: CISandFVIS@education.vic.gov.au

Booqo mareegaha: [vic.gov.au /child-information-sharing-scheme](http://vic.gov.au/child-information-sharing-scheme)

